

Shattiyada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

Hawsha Fattashaadda Injineeriyada

La Casriyeyay Diseembar 2014

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

Goorma ayaan diyaar u ahay in aan u yeerto fattashaadda?

Dhamaan fattashaadda, shaqada waa in la dhamaystiro, horay loo baaro lana diyaariyo. Haddii la soo saaray warqadda fiirinta handasada, waa in la xalliyo dhamaan waxyaabaha ku qoran warqadda ka hor inta aan loo yeerin fattashaadda. Koobiga handasada la ogolaadaay iyo koobiga warqadda fiirinta handasada waa in lagu haayo goobta shaqada waqtiga fattashaadda.

Waxaa jira habab dheeraad ah oo lagu ogaado sida aad diyaar ugu tahay noocyada fattashaada.

- **Digniinta Dabka**

Ka hor inta aan loo yeerin fattashaadda, Waaxda Handasada iyo Horumarinta (Department of Planning and Development) waa in ay saxiisdo ruqsadda korantada iyo waa in siistemka horay loo tijaabiyo. Tani waxaa ka mid ah dhamaan qalabka dheeraadka ah iyo kantaroolka digniinta dabka. Goobta waa in loo arko in ay gaarsiisan tahay "Nadaafadda Ugu Dambayso", sida, kumana eka, dhamaan katiifadaha, saqaafka, darbiyada iyo albaabada la geliyay si loo fulliyo tijaabinta digniinta maqalka.

- **Daboolka Dhulka Hoose**

Waa in la fulliyo fattashaadda tubada dhulka hoose ka hor inta aan la daboolin. Dhamaan biraha leysku xerxero, iwm. waa in ay dhamaystiran yahiin lana

mariyo laami ama maado kale oo hakkisa mirirka la ogolaan karo. Waxaa dhici karto in la fulliyo fattashaadda blogyada inta uu socdo shubka ama kaddib. Waa in ay muuqdaan joogga iyo ballaca blogga si loo cabbiro.

- **Xoogga Dhulka Hoose**

Waa la dabooli karaa dhulka hoose haddii la fulliyo fattashaadda daboolka, hase ahaatee, dhibcaha cadaadiska waa in ay ku jiraan xuduudda ka ogol yahay. Waa in la helo xoogga ka hor inta aan lagu xerin dhismaha ama Magaalada. Haddii la geliyay albaabka hubinta Magaalada, waa in la geliyo "surfiyada kariska."

- **Biyaha Dhulka Hoose**

Waa in la fulliyo fattashaadda ka hor inta aan lagu xeranin siistemka dhismaha.

- **Daboolka Tubada Waraabinta**

Waa in aad wacdid fattashaadda daboolka ka hor inta aan la gelinin darbiga ama matoneelaha farageliya aragtida. Waqti kasta oo la baddalo ama la dhaqaajiyo madaxa waraabinta, waa in la sameeyo fattashaad.

- **Fattashaadda Wiishka**

Waa in aan la codsanin fattashaadda ilaa laga saxiixo ruqsadda korantada iyo wiishka loona geliyo si dhaamaystiran siistemka digniinta dabka.

Yaa loo baahan yahay in aan waco si aan u codsado fattashaad?

Codsiyada fattashaadda, wac (206) 386-1443 ama waxaad wici kartaa qofka loo xilsaaray fattashaadda xaafadda aad ka daggan tahay magaalada, haddii aad taqaanid magaca iyo/ama nambarka. Dhamaan siistemyada u baahan in la tijaabiyo waa in horay loo

LAMA QAADIN MAS'UULIYADDA SHARCIGA: Ma aha in Qoraalka Taakuleynta Macaamilka (Client Assistance Memo) (CAM) loo isticmaalo in lagu baddalo xeerka iyo sharciyada. Shakhsiyaadka waxay mas'uul ka yahiin u hoggaansamida dhamaan sharuudaha xeerka iyo sharciyada, haddii lagu sharaxay CAM ama haddii aan lagu sharxin.

www.seattle.gov/fire

Fire Prevention Division
220 3rd Avenue South
(206) 386-1450



City of Seattle
Fire Department

(U gudub bogga xiga)

tijaabiyo ka hor inta aan la gaarin taariikhda ballanka fattashaadda.

Maxuu yahay macluumaadka loo baahan yahay in aan bixiyo marka aan waco si aan u codsado fattashaadda?

Magacaada, shirkadaada, nambarka telefoonkaada, ciinwaanka fattashaadda, Shahaadada Waaxda Dabka. Nambarka geliyaha/tijaabiyaha imaan doono waqtiga tijaabinta, Nambarka Fiirinta Handasada Waaxda Dabka Seattle, nooca fattashaada, iyo tirada qalabka loo baahan yahay in la tijaabiyo.

Kaddib marka aan waco, goormaan filan karaa fattashaadda?

Waxaa dhici karto in lala kulmo hakkad taasoo ugu wacan helitaanka dadka sameeya fattashaadda. Boggaan [form](http://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/OvertimeInspectionForm.pdf) (www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/OvertimeInspectionForm.pdf) waxaa laga codsan karaa fattashaadda waqtiga dheeraadka ah kaddib marka la bixiyo khidmad, waxaana la buuxin doonaa hadba sida loo helo dadka fattasha. In si taxadir leh loogu hoggaansamo hababka ku qoran warqadaa waxay yareyn doontaa suurtoogalka in lala kulmo dib u dhac.

Ma loo baahan yahay in aan joogo marka uu yimaado qofka qaabilsan fattashaadda? Ma u baahanahay in aan goobta ku haysto handasada la soo ogolaaday?

Waa in uu joogo wakiil awood u leh fullinta tijaabinta loo baahan yahay, awood u leh fududeynta meelaha la fattasho, iyo shahaado ka haysto Waaxda Dabka Seattle. Qofkaan waa in uu:

- qofka fattasha u soo bandhigo kaarka shahaadada si loo xaqiijiyo.
- haysto koobiga handasaha la soo ogolaaday.
- haysto koobiga warqadda fiirinta

Haddii aan u baahanahay in aan la hadlo qofka wax fattasha, goorma lala xariiri karaa isaga/iyada?

Ballamada waxaa la bixiyaa inta u dhexeyso 8:00

subaxnimo iyo 9:00 subaxnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waqti kasta, fariin ayaa fattashaha loogu dhaafi karaa (206) 386-1443. Dadka wax fattasha waa ka soo jawaabaan telefoonada loo diro marka ay ku sugan yahiin xafiiska.

Maxaan sameyaa haddii aan qabo su'aal la xariirta sharciga maalinimada marka aan la heli karin fattashaha?

Waa la heli karaa Madaxa Qeybta Injineeriyada (Lieutenant of Engineering), ama Injineerka Badbaadinta Dabka, maalinimada si looga jawaabo su'aalaha qaar ee la xariira Sharciga Dabka Seattle. Waxaa lagala xariiri karaa (206) 386-1443. Xasuuso: Waxaa la ogolaan kaaraa in la waco Injineerada Fiirinta Qorshaha lana weydiyo su'aalaha la xariira Sharciga Dabka, hase ahaatee fadlan ha u wicin dhibatooyinka la xariira fattashaadda dibadda.

Ma leygoo soo dallici doonaa fattashaadda injineeriyada lagu guul dareystay ama laga baaqday?

Khidmadaha fattashaadda dhismaha Waaxda Dabka Seattle waxaa ka mid ah fattashaadda lagu celceliyo oo aan lagu soo dallicin kharash haddii siistemka uusan gudbin fattashaadda kowaad. Hase ahaatee, haddii la'aanta diyaarinta qandaraaslaha sabab u tahay fattashaadda lagu guul dareystay, Sharciga Dawladda Hoose ee Seattle (Seattle Municipal Code) wuxuu Waaxda Dabka Seattle siiyaa awood ay ku soo ceshto kharashka waaxda uga baxay fattashaadaas. Sannadka 2015, khidmadda waa \$176 halkii saac, marka lagu daro waqtiga fattasheyaasha geliyaan diyaarinta fattashaadda, safarka, iyo shaqada laga qabto goobta. Waxaa lagu dallici doonaa khidmad marka lagu guul dareysto fattashaadda la xariirto asbaabta soo socoto:

1. Dhamaan qalabka iyo shaqaalaha loo baahan yahay kana mid ah kuwa qaba shahaadada ku habboon oo aan joogin goobta muddo 20 daqiiqo gudahooda laga bilaabo waqtiga la ballaamay.
2. Marka aan la dhamaystirin tijaabinta-hore iyo/ama aan la heli karin warqadaha tijaabinta-hore ka hor

inta aan la bilaabin fattashaadda lagu ballamay.

3. Marka aan goobta lagu haynin handasadda siistemyada dabka oo shabbadeysan/la ogol yahay (tubada waraabinta, digniinta, iwm.).
4. Marka aan la awoodin in la bixiyo caddeynta saxiixa ruqsadda korantada DPD, haddii lagu dabaqi karo.
5. Marka aan la haynin caddeynta DPD xagga wiishashka (sumadda caddeynta ugu dambayso), haddii lagu dabaqi karo.
6. Marka la daboolo tubada waraabinta ka hor inta aan lagu sameynin fattashaad (kana mid ah darbiyaada iyo saqaafka).
7. Marka la daboolo leenka tubada waraabinta dhulka hoose ka hor inta aan la fattashin.
8. Waxaa kaloo laguugu soo dallici doonaa khidmaadan haddii la joojiyo fattashaadda muffo ka yar 24 saac oo ogeysiis ah.

Maxaan sameyaa haddii aan fahmin saxidda loo baahan yahay?

Waxaad si toos ah ula xariiri kartaaa fattashaha lagu xil saaray ama waxaad kala xariiri kartaa (206) 386-1443 si aad u heshid sharaaxaad kasta ama caddeyn kasta oo loo baahan karo.

Goormaan daggi karaa ama isticmaali karaa dhismaha?

Waxaa la ogol yahay dagidda iyo isticmaalka dhismaha kaddib marka ay soo ogolaato Waaxda Handasaha iyo Horumarinta oo keliya. Waxaad jebisay sharciga haddii aad dagtid dhismaha ka hor inta aadan helin ogolaashadaan. Waaxda Dabka waxay u aragtaa dagid marka shaqaalaha aan-dhismaha ku lug lahayn ama dadka bilaabaan in ay meesha ka shaqeyaan ama isticmaalaan dhismaha. Dagidda waxay kaloo dhacdaa marka dhismaha la soo geliyo alaab aan joogto ahayn oo aan weli leysku xerxerin ama qalab.

Goorma ayaan codsan karaa ogolaashada aan ku daggo dhismaheyga?

Marka siistemyada badbaadinta dabka la ogolaado lana fattasho lana dhamaystiro jidadka ka bixidda.

Maxay yahiin khidmadaha laga bixiyo fattashaadda?

Fadlan fiiri macluumaadka ku yaal bogga internetka Xafiiska Hirgelinta Sharciyada Dabka: <http://www.seattle.gov/fire/inspections>.

Haddii aan dhisaha la galo heshiis ku saabsan dhismaha, yaa mas'uul ka ah in uu waco fattashaadda iyo ogolaashada daggidda ugu dambayso?

Milkiilaha sharciga ayaa mas'uul ka ah in uu waco fattashaadda iyo ogolaashada. Haddii aad dooneysid in dhisahaada qaato mas'uuliyadaan, tani waa in lagu caddeeyo heshiiska. Hubso ruqsadaada iyo hubso in la bixiyay ogolaashada kama dambaysta ee la hubo si loo daggo, ka hor inta aadan u guurin dhismaha. Caadi ahaan, shirkadda gelinta ayaa qabata ballanka fattashaadda gelintooda.

Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan sharuudaha adeegga Danabka Dadweynaha Seattle (SPU)?

Si loo ballamiyo fattashaadda SPU xagga daaboolka dhulka hoose ama qalabka biyaha gadaal ka baxa ka baxa, wac (206) 684-5803, laga bilaabo 8:00 ilaa 9:00 a.m., ama 9:00 a.m. kaddib, wac (206) 684-3333.

SPU waxay u baahan tahay fattashaadda tubada adeegga biyaha loo isticmaalo badbaadinta dabka iyo biyaha xaafadda. Fadlan raac xariiradaan (links) si aad macluumaad badan uga heshid SPU:

Daboolka Dhulka Hoose: <http://www.seattle.gov/util/MyServices/Water/WaterService/InstallationRequirements/index.htm>

Sharuudaha Biyaha Gadaal ka Baxa: http://www.seattle.gov/util/MyServices/Water/Water_Quality/CrossConnectionControl/index.htm

SMC 21.04.070 Cross-Connections: <http://clerk.ci.seattle.wa.us/~public/code1.htm>

WAC 246-290-490: <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=246-290-490>